



Mudane Diijon DaCosta, Sr., *Guddoomiyaha Guddiga*
 Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*
 Marwo Anna Hill
 Marwo Whitney McGinniss
 Marwo Allyson Gevertz
 Marwo Vickie B. Turner
 Dhaqtar Joyce Morley

Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

WIXII FASAXID DEGDEG AH

Oktoobar 14, 2024

Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110
 Carla Parker 404-734-1717

GSBA Waxay ku Maamuustay Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb Abaalmarinta Guddiga Dugsiga Tayada oo Heerka sare ee Maamulka iyo Guusha Ardayda

(STONE MOUNTAIN, GA) – Isbuucii la soo dhaafay, Ururka Guddiyada Dugsiga Georgia (GSBA) ayaa ku dhawaaqay in Guddiga Dugsiga Gobolka DeKalb uu kasbaday aqoonsiga *Guddiga Dugsiga Tayada 2024* oo u heelanaantooda heerarka aasaasiga ah ee maamulka iyo hoggaaminta, iyadoo dhidibada u aasaya hormarinta iyo hormarka socdo ee degmada. Maamuuskaan sharafta leh wuxuu tilmaamayaa u heelanaanta Guddiga ee illaalinta dhaqamada maamulka muhiimka ah iyo abuurista jawi taageero leh halkaasoo hogaamin xoogan ay ganac ka geysato guusha ardayda.

“Abaalmarintaan waxay ka tarjumeysaa awooda iskaashiga, dadaalka, iyo ka go’naanta la wadaago ee heerka sare,” waxaa yiri Guddoomiyaha Guddiga Mudane Diijon DaCosta, Sr. “Hogaaminta waxay ka bilaabmaa meesha ugu sareysa, iyo sida Guddi mideysan, waxaa naga go’an inaan bedelno sida aan u sameyno ganacsiga— hogaamino dhaqan heer sare ah, daahfurnaan, iyo isla xisaabtan iyadoo lala dhisayo kalsooni bulshadeena. Aqoonsigaan wuxuu tilmaamayaa saameynta xoogan ee dadaaladeena lagu sare loogu qaadayo natiijooyinka waxbarashada. Dhammaadka maalinta, diiradeenad waxay ahaaneysaa inaan u sameyno waxa u fiican carruurteena, xaqiijinta guushooda iyo faydo qabkooda degmadeena oo dhan.”

Kormeeraha Guud ee Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb Dhaqtar Devon Q. Horton wuu aqbalay.

"Kasbashada aqoonsiga Guddiga Dugsiga Tayada 2024 waa guul muhiim u ah Guddigeena Waxbarashada," Dhaqtar Horton ayaa yiri. "Waxay tilmaameysaa maamulka waxtarka leh ee sii kordhaya iyo hoggaaminta aasaaska u ah howlgalkeena Sameynta waxa muhiimka u ah inaan ku bixino waxbarasho tayo sare leh halkaan Gobolka DeKalb. U heelanka Guddigeena ee mabaadi'daan ayaa si toos ah u saameeyso guusha ardaydeena iyo shaqaalaheena. Waan ku faanaa inaan ka dhinac shaqeeyo kooxdaan xirfadlayaasha ay ka go'antahay."

Sida qeyb ka ah aqoonsiga, GSBA waxay ku sharfayaan qaataha Shirka Sannadlaha 2024 GSBA/GSSA ee Atlanta oo Diseembar AH.

Kormeerayaasha guud ee Georgia iyo xubnaha Guddiga waxay hormariyeen Barnaamijka Aqoonsiga Kooxda Maamulka GSBA si ay ugu dabaaldagaan hogaaminta aan caadiga aheyn ee guddiga dugsiga sida ku saleysan heerarka guddiga gobolka.. Tan iyo bilowgeesii gudaha 1998, barnaamijkaan wuxuu halbeeg u ahaa heerka sare ee maamulka, qaabeynta Georgia sida gogaanka qaranka ee heerarka maamulka waxbarashada.

Fadlan ka booqo [Qeybta Abaalmarinta GSBA ee websaydka](#) wixii warbixin dheeraad ah ee abaalmarinada GSBA iyo barnaamijyada aqoonsiga ama si loo fiiryo sharuuda buuxdo heerarka Guddiga.

XXX